


Naga Caawi Abuuritaanka Dugsiga Sare Jefferson oo Casriyeysan



Faahfaahinta Qorshaha Dugsiga Sare Jefferson ee Cusub

PPS waxay horay ugu socotaa naqshadeynta Dugsiga Sare Jefferson ee cusub oo laga dhisayo dhinaca Waqooyi ee kambaska oo dhismuhu bilaabmayo xagaaga 2025. Dugsiga waxaa ku jiri doona goobo waxbarasho oo khaas ah oo loogu talagalay barnaamijyada Waxbarashada Farsamada Xirfadeed [CTE] ee gaarka ah ee Jefferson. Waxyaabaha kale ee muhiimka ah waxaa ka mid ah masraxa cusub oo Jefferson ah oo leh 1,000 kursi, meel ay wadaagaan ardayda, goobo gaar ah oo loogu talagalay ururada bulshada deegaanka, iyo xarun cusub oo loogu talagalay waalidiinta da'yarta ah. Goobta orodka iyo garoonku waa la rari doonaa oo dib ayaa loo jihayn doonaa, iyadoo leh kuraas cusub. Goobta orodka iyo garoonku waa la rari doonaa oo dib ayaa loo jihayn doonaa, iyadoo leh kuraas cusub. Intaa waxaa dheer, garoomo baseball cusub iyo garoomo softball oo leh caws cusub iyo kuraasta kooxda ayaa lagu dari doonaa.

Ardayda iyo shaqaalaha waxay ku sugnaan doonaan xarunta inta lagu jiro habka dhismaha ee afarta sano ah.

Taariikhda Mashruuca

Qorshaynta dhamaystiran ee Jefferson waxay bilaabatay 2021. Muddadii labada sano ahayd ee qorshaynta iyo ka-qaybgalka ballaaran ee bulshada, PPS waxay samaysay qorshe ay ku jiraan casriyaynta dhismihii asalka ahaa ee 1909 iyo dhisidda tas-hiilaad cusub oo ku xeeran. Qorshahan ayaa ardayda ku haysay goobta inta uu dhismuhu socdo. Si kastaba ha ahaatee, falanqaynta qiimaha qoto dheer ee 2023 ayaa muujisay in dib-u-cusboonaysiinta

dhismaha afarta dabaq ah, iyadoo ardayda lagu haayo goobta, waxay aad uga badnaan doontaa miisaaniyada. Hab cusub ayaa loo baahnaa.


Bishii Disembar 2023, Guddiga Waxbarashadu waxay ku baaqeen in si buuxda loo qiimeeyo qorshayaasha casriyaynta ee Jefferson oo leh shuruudahan soo socda.

- Ku hay ardayda iyo shaqaalaha xarunta Jefferson inta dhismuhu socdo.
- Ku dar diiwaangelinta arday dhan 1,700.
- Dumi dhismihii 1909 oo dhis dhisme cusub.

Abriil 2-deedii, 2024, Kooxda Mashruucu waxay soo bandhigeen qorshe dib loo eegay oo loogu talagalay dhismaha cusub ee Dugsiga Sare Jefferson oo laga dhisay dhanka waqooyi ee xarunta oo ku taal wadada Killingsworth. Qorshahan waxa ku baxaya \$491 milyan oo ka dhigan \$125 milyan in ka badan \$366 milyan oo uu bixiyey Bond-ka Horumarinta Dugsiga 2020. Si loo dhamaystiro mashruuca, maalgelinta ayaa looga baahan doonaa Bond-ka Horumarinta Dugsiga ee soo socda.



Naga Caawi Abuuritaanka Dugsiga Sare Jefferson oo Casriyeysan



Fursadaha Ka-qaybgalka Bulshada ee soo socda

Bilaha soo socda PPS waxay qaban doontaa shirar isdaba joog ah si ay u bixiyaan warar cusub oo ay fikrad uga helaan bulshada Jefferson. Qaar ka mid ah su'aalaha PPS ay ku weydiin doonaan waxaa ka mid ah:

- Maxaad rabtaa in dugsiga cusub u ekaado oo uu noqdo?
- Markaad booqato dugsiga, waa maxay qaybaha taariikhda bulshada ee aad rabto inaad aragto, dareento oo aad la kulanto?
- Xarunta cusub waxa ka mid ah meelo bannaanka ah la wadaago, barxad, jidad lagu socdo, iyo muuqaalada dhulka. Waa maxay nooca waxqabadyada aad rabto inaad aragto oo ka dhacaya meelahaas?

Talaabooyinka Xiga

Marka xigta habka naqshadaynta Jefferson, PPS iyo Kooxda Nashqadaynta waxay la shaqayn doonaan shaqaalaha dugsiga iyo bulshada si loo:

- Hagaajiyo qaabka goobta iyo xiriirka ay la leedahay xaafadda.
- Baro sida muuqaalka dhulka iyo beeraha loo isticmaali doono.
- Go'aamiyo booska gudaha ee dhismaha cusub.
- Horumariyo aragti waaritaan oo la wadaago dugsiga cusub.

Jadwalka Mashruuca

**May 2024 -
Oktoobar 2025**

Naqshadeynta &
Dokumentiyada

**Febraayo 2025 -
Febraayo 2026**

Isticmaalka Dhulka
& Oggolaanshaha

**Xagaaga 2025 -
Dayrta 2028**

Dhismaha

Dayrta 2028

Ardayda &
Shaqaalaha waxay
u guuri doonaan
dhismaha cusub

**Dayrta 2028 -
Dayrta 2029/8**

Shaqada goobta
ayaa sii socota

Si joogto ah u booqo websaydka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

Websaydka casriyaynta ee Jefferson, <https://www.pps.net/JeffersonBond> waxa lagu cusboonaysiiyay horumarkii mashruucii ugu dambeeyay oo waxa uu bixiyaa liiska fursadaha hawlgelinta ee soo socda. La wadaag fikradahaaga Kooxda Mashruuca ama ku weydii su'aal halkan JHSBond@pps.net.

